



NATIONWIDE CHILDREN'S
When your child needs a hospital, everything matters.™

Helping Hand™

Health Education for Patients and Families

Tilmaamaha Qaadida Saxarada Stool Collection Guidelines (Somali)

Saxarada ilmahaaga (saxarada) waa in la baaro si aan u qorsheyno daaweyntiisa. Waxaad u baahan doontaa inaad guriga ka soo qaado (munnada) saxarada oo aad keento Xarunta Adeegga Sheybaarka ee Nationwide Children's Hospital. (Nationwide Children's Hospital Laboratory Service Center).

Waxaad u baahaneysaa

- Weelka saxda ah ee loogu talagalay baaritaanka ayaa lagu dalbay (Sawirka 1 aad). Dhammaan baaritaanadu ma isticmaalaan isku weel.
- Alwaaxa yar oo sida qaado camal u qoran ama qaado
- Cunuga wayn, koofida musqusha (Sawirka 2 aad) ama baakad caag ah
- Calaamadee si aad u geliso weelka
- Gacmo gashiyada la tuuri karo (ikhtiyaari ah)

Sida loo calaameeyo caaga

1. Magaca rasmiga ah ilmaha oo dhammaystiran – magacyada koowad iyo kan labaad oo dhammaystiran, oo si fiican loo soo qoray
2. **Mid** kamid ah aqoonsiyada gaarka ah ee soo socda:
 - Taariikhda dhalashada **ama**
 - Lambarka Aqoonsiga Bukaanka **ama**
 - Lambarka diiwaanka caafimaadka ee Nationwide Children



Sawirka 1 aad Saxarada waxaad ku keeneysaa weel sida kuwa leh daboolka oo ayna dusha wax kaga aoran vihiin.



Sawirka 2 aad koofida musqusha wuxuu gacan ka geysan karaa aruurinta muunada saxarada cunugaaga wayn.

Waxay noqon kartaa mid aad kuu caawisa in aad samayso talaabada 1 iyo 2 kahor inta aadan bilaabin aruurinta.

3. Taariikhda aruurinta muunadda (BISHA/TAARIIKHDA/SANADKA) – sidaan u qor markaad aruuriso saxarada KADIB.
4. Wakhtiga la qaado muunadda saxarada (ay kamid yihiin sabaxdii ama gelinka dambe) – sidaan u qor markaad aruuriso saxarada KADIB.

Xaruumaha caafimaadka ee Nationwide Children's waxay ku siin karaan calaamada diiwaangelinta ee EPIC si aad weelka ugu dhajisid.

Sida loo qaado muunada

Qaad muunada xitaa haddii saxarada cunugaagu tahay mid jilicsan, saxaro biyo-biyo ah ama shuban ah.

Iska dhaq gacmaha gashana galoofyo kahor iyo kadib marka aad qabanayso saxarada cunugaaga. Saxarada waxaa kujiri kara jeermisyo faafiya caabuqa.

Si baaritaanku u noqdo mid saxan:

- Waa in dabada cunugaaga aysan lahayn kareemo ama saliid. Hase yeeshee, haddii cunugaagu qabo nabarada xafaayadu keento, waa CAADI in la isticmaalo budada galeyda, saliid (faasaliin®) ama Resinol®. Maadooyinkaas ma saameynayaan baaritaanka.
- Saxarada waa inuusan la qasmin kaadida.
- **Haka soo qaad in saxarada musqusha.**

Ilmaha

Kasoo qaad saxarada xafaayada. Haddii cunugaagu qabo shuban ama leeyahay saxaro jilicsan, balaastig ku dheji geeska maqaarka geeska xafaayada. Uga tag xafaayada sidaan muddo dheer si ay u aruuriso saxaro badan.

Socod baradka


Haddii ilmahaaga socod baradka ah uu kujiro tababarka musqusha, waxaad tababarka u isticmaali kartaa tuunji nadiif ah, oo qalalan, buumaha tababarka ama xafaayad si aad u qaado xoogaa saxaro ah.

Carruurta Weyn

- Isticmaal koofida musqusha oo nadiif ah, oo qalalan, si aad ugu soo qaado saxarada (Sawirka 2 aad, bogga 1 aad). Geli koofida musqusha qaybta gadaale ee geesaha saxanka musqusha, gudaha kursiga musqusha.
- Haddii aad isticmaalayso dabool balaastig ah, si debacsan ugu duub bacda saxarada jilicsan guud ahaan geesaha labada gees ee saxanka musqusha. Saxaradu waxay ku dhici kartaa balaastikada.

Sida loo diyaariyo muunada

1. Kahor inta aadan gelin saxarada weelka muunada, fiiri boggaga 4 aad iyo 5 aad si aad u ogaado cadadka saxda ah, waqtiga iyo tilmaamaha kale ee gaarka ah oo loogu talagalay baaritaanka ilmaha loo diray.
2. Hubi sumadda si aad u xaqiijiso in uu leeyahay magaca sharciga ah ee canugaaga oo buuxa, taariikhda uu dhashay, lambarka aqoonsiga bukaanka ama lambarka diiwaanka caafimaadka. Kadibna qor taariikhda iyo waqtiga aad aruurisay saxarada. Fadlan ogoow, muunadda lama baari doono haddii uusan magaca ama ugu yaraan aqoonsi kale oo uu bukaanku leeyahay ku dheganayn sumadda.
3. Isticmaal alwaax yar oo sida qaado camal u qoran (Sawirka 3 aad) ama qaado si aad cadadka saxarada oo sax ah ugu rido weelka muunada ee baaritaanka.
4. Ku rid boorso bac ah oo dib loo xiri karo.
5. Keen muunada saxarada ah Xarunta Adeega Shaybaarka isla markiiba intii macquul ah. Waa inaad keenin isla markiiba marka aad qaado, qaar kamid ah muunooyinka waxay u baahan yihiin in la geliyo qaboojiyaha ama baraf laga dhigo.



Sawirka 3 aad Baaritaan kasta wuxuu leeyahay tilmaamo u gaar ah. Kahor inta aadan gelin saxarada weelka muunada, fiiri boogagga 4 aad iyo 5 aad.

Haddii aad aruurinayso muunada wax ka badan hal cunug:

- Dhaq gacmahaaga iyo weelka muunada kahor inta aadan ilmo kasta ka qaadin saxaro.
- Xaqiiji inaad dusha wax kaga qorto muuno kasta aadna si fiican u buuxiso.
- Geli dhammaan mid kasta oo kamid ah muunooyinka ilmaha weel gaar ah oo dib loo xiri karo.

Meesha la geynaayo

Inta lagu jiro maalinkii:

- Xarun kasta oo ah Adeega xarunta Sheybaarka ama Nationwide Children's *Oo u Dhaw Guriga*™ inta lagu jiro saacadaha ganacsiga joogtada ah. Haddii aad rabto inaad ogaato saacadaha ganacsiga iyo goobaha, fadlan Adeegyada Sheybaarka ka wac (800) 934-6575 ama booqo NationwideChildrens.org/Lab.
- Sheybaarka Nationwide Children's Orange ee ku yaala 555 S. 18th Street, Columbus, Ohio 43205. Saacadaha shaqadu waa Isniinta illaa Jimcaha, 8 da subaxnimo illaa 7 da fiidnimo iyo Sabtida, 8:30 subaxnimo illaa 3:30 galabnimo.

Fiidkii:

- Waaxda Ogolaanshaha Isbitaalka ee Nationwide Children's ee xarunta guud. Saacadaha geynta waa Isniinta illaa Jimcaha, 7 da fiidnimo illaa 11:30 habeenimo.

Fadlan ha geynin muunada saxarada Waaxda Degdega.

Wixii su'aalo ah, Adeegyada Shaybaarka ka wac (800) 934-6575 ama dhakhtarka daryeelka ilmahaaga

JADWALKA SAXARO ARUURINTA

MAGACA BAARITAANKA	WEEKLA ARUURINTA	SAWIRKA WEEKLA	TILMAAMAHA ARUURINTA	XASILOONIDA *Oo ay ku jiraan gaadiidka iyo waqtiga tijaabinta
Fayrasyada saameeya nudaha sanka, cunaha iyo hawo mareenka (Adenovirus) 40/41 Antigiin, Saxarada	Weelka Muunada (dabool buluug ah)		Isticmaal alwaax yar oo sida qaado camal u qoran ama qaado (ha isticmaalin qoriga muunada) si aad ugu yaraan ugu soo qaado 1/2 qaado oo saxaro ah aadna ugu rido weelka muunada oo nadiif ah.	La qaboojiyay - 72 saacadood Barafoobay - 1 bil
Sheybaarka borotiinka dhiiga (Alpha 1 Antitrypsin Quantitative), saxarada	Weelka Muunada (dabool buluug ah)		Isticmaal alwaax yar oo sida qaado camal u qoran ama qaado (ha isticmaalin qoriga muunada) si aad ugu yaraan ugu soo qaado 1 qaado oo saxaro ah aadna ugu rido weelka muunada oo nadiif ah.	Heer kulka qolka - 24 saacadood La qaboojiyay - 7 maalmood Barafoobay - 3 bilood
Baaritaanka, saxarada	Weelka Muunada (dabool buluug ah)		Isticmaal alwaax yar oo sida qaado camal u qoran ama qaado (ha isticmaalin qoriga muunada) si aad ugu yaraan ugu soo qaado 1 qaado oo saxaro ah aadna ugu rido weelka muunada oo nadiif ah. Marka aad saxarada ka aruurinayso xafaayada, ha aruurin saxarada gaarta geesaha xafaayada.	Heer kulka qolka - 10 maalmood Barafoobay - 12 bilood
Bakteeriyada sababta shubanka (Clostridium difficile) Hidaha sidaha Toxin	Weelka Muunada (dabool buluug ah)		Isticmaal alwaax yar oo sida qaado camal u qoran ama qaado (ha isticmaalin qoriga muunada) si aad ugu yaraan ugu soo qaado 1 qaado oo saxaro ah ama ugu yaraan 1/2 qaado oo saxaro jilicsan ah ama saxaro shuban ah si aad ugu rido weelka muunada oo nadiif ah.	Heer kulka qolka - 24 saacadood La qaboojiyay - 5 maalmood Barafoobay - aan lahayn waqti xadidan
Dhaqanka, Saxarada	Cary Blair (weel leh dabool cagaar ah oo uu kujiro dheecaan casaan ah)		Isticmaal qaadada lagu soo qaado saxarada (oo kujirta weelka) ama alwaaxa yar ee sida qaadada u qoran si aad ugu soo qaado saxarada. Ku shub dheecaan ku filan weelka illaa dheecaanku gaaro calaamada casaanka ah. Si degan u xir furka oo gees-geeska u leexi dhowr jeer illaa ay si fiican u qasmaan.	Saxarada waa in la geliyo gudaha weelka 2 saac gudahood kadib marka la aruuriyo. Heer kulka qolka - 24 saacadood La qaboojiyay - 72 saacadood.
	Usha baaritaanka oo labo xabo ah		Labada suuf ee baaritaanka ku riix xoogaa afka dabada (murqaha dabada) si aad ugu soo qaado saxaro. Tuubada yar ee suuf leh geli tayuub balaastig ah. Afka tuubada yar ee leh suufka waa inay taabtaan isbuunyada qoyan ee dhammaadka tuubada.	Heer kulka qolka - 24 saacadood La qaboojiyay - 24 saacadood
Xaydha saxarada, Tayo leh	Weelka Muunada (dabool buluug ah)		Isticmaal alwaax yar oo sida qaado camal u qoran ama qaado (ha isticmaalin qoriga muunada) si aad ugu yaraan ugu soo qaado 1 qaado oo saxaro ah aadna ugu rido weelka muunada oo nadiif ah.	La qaboojiyay - 2 asbuuc Barafoobay - 2 asbuuc
Baaritaanka Fayruska Caloosha (GI)	Weelka muunada lagu shubo (weel leh dabool cagaar ah oo uu kujiro dheecaan casaan ah)		Isticmaal qaadada lagu soo qaado saxarada (oo kujirta weelka) ama alwaaxa yar ee qaadada camal ah si aad ugu soo qaado saxarada. Ku shub dheecaan ku filan weelka illaa dheecaanku gaaro calaamada casaanka ah. Si degan u xir furka oo gees-geeska u leexi dhowr jeer illaa ay si fiican u qasmaan.	Saxarada waa in la geliyo gudaha weelka 2 saac gudahood kadib marka la aruuriyo. Heer kulka qolka - 24 saacadood La qaboojiyay - 72 saacadood
Sheybaarka Giardia/antigiinka Cryptosporidium, saxarada	Total-Fix (weel daboolka caddaan ah leh) ama Cary Blair (weel leh dabool cagaar ah oo uu kujiro dheecaan casaan ah)		Isticmaal qaadada lagu soo qaado saxarada (oo kujirta weelka) ama alwaaxa yar oo cusub oo sida qaadada u qoran si aad ugu soo qaado saxarada. Iskuday inaad saxarada kasoo qaado meelaha leh dhiiga ama xabka badan. Ku shub saxaro ku filan weelka illaa dheecaanku gaaro calaamada midabka leh. • Weelka leh daboolka caddaanka ah wuxuu leeyahay layn madoow ah. • Weelka leh daboolka cagaarka ah wuxuu leeyahay layn casaan ah. Si degan u xir furka oo gees-geeska u leexi dhowr jeer illaa ay si fiican u qasmaan.	Saxarada waa in la geliyo gudaha weelka 2 saac gudahood kadib marka la aruuriyo. Weelka Total-Hagaaji weelka (daboolka cad) • Heer kulka qolka - 2 bilood • La qaboojiyay - 2 bilood Weelka muunada lagu shubo ee Cary Blair (daboolka cagaaran) • La qaboojiyay - 2 asbuuc

Haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah ama aad dooneyso macluumaad ku saabsan baaritaankaaga, wac (800) 937-6575 ama booqo NationwideChildrens.org/Lab

JADWALKA SAXARO ARUURINTA

MAGACA BAARITAANKA	WEELKA ARUURINTA	SAWIRKA WEELKA	TILMAAMAHA ARUURINTA	XASILOONIDA *Oo ay ku jiraan gaadiidka iyo waqtiga tijaabinta
Baariitaanka lagu oggaado bakteeriyada (Gram Stain) (Saxarada WBC)	Usha baariitaanka oo labo xabo ah		Labada suuf ee baariitaanka ku riix xoogaa afka dabada (murqaha dabada) si aad ugu soo qaado saxaro. Tuubada yar ee suuf leh geli tayuub balaastig ah. Afka tuubada yar ee leh suufka waa inay taabtaan isbuunyada qoyan ee dhammaadka tuubada.	Heer kulka qolka - 24 saacadood
Dhiiga Saxarada, Saxarada	Weelka Muunada (dabool buluug ah)		Isticmaal alwaax yar oo sida qaado camal u qoran ama qaado (ha isticmaalin qoriga muunada) si aad ugu yaraan ugu soo qaado 1 qaado oo saxaro ah aadna ugu rido weelka muunada oo nadiif ah.	La qaboojiyay - 8 saacadood
	Kaarka baariitaanka saxarada (Hemocult Card)		Shaybaarka ama dhakhtarka daryeelka cunugaaga wuxuu kusiin doonaa kaarka baariitaanka saxarada iyo qori yar si aad u baarto dhiiga saxarada. Isticmaal qoriga si aad saxarada uga soo qaado 2 meelood oo kala duwan . - Ku shub caaga yar ee dheecaanka la marmariyo (caaga muunada marka lasoo qaado lagu dhib ciyo) ee ku jira gudaha bokiska A ee afar geeska ah ee saxarada. - Saxarada 2aad ku shub caaga yar ee lagu dhibciyo dheecaanka la qaadaayo oo kujira bokiska B ee afar geeska ah ee saxarada.	Heer kulka qolka - 14 maalmood
Bakteeriyaaalka mareenka dheefshiidka, Ogaanshaha Sunta, Saxarada	Weelka Muunada (dabool buluug ah)		Isticmaal alwaax yar oo sida qaado camal u qoran ama qaado (ha isticmaalin qoriga muunada) si aad ugu yaraan ugu soo qaado 1/2 qaado oo saxaro ah aadna ugu rido weelka muunada oo nadiif ah. Ha soo qaadin saxarada ay gaartay kaadidu.	La qaboojiyay - 72 saacadood Barafoobay – aan lahayn waqti xadidan
Baariitaanka Gooryaanka (O&P)	Total-Fix (weel daboolka cad)		Isticmaal qaadada lagu soo qaado saxarada (oo kujirta weelka) ama alwaaxa yar oo cusub oo sida qaadada u qoran si aad ugu soo qaado saxarada. Iskuday inaad saxarada kasoo qaado meelaha leh dhiiga ama xabka badan. Ku shub saxaro ku filan weelka illaa dheecaanku gaaro calaamada madoowga ah. Si degan u xir furka oo gees-geeska u leexi dhowr jeer illaa ay si fiican u qasmaan .	Saxarada waa in la geliyo gudaha weelka 2 saac gudahood kadib marka la aruuriyo. Heer kulka qolka - 14 saacadood La qaboojiyay - 14 maalmood
Baariitaanka Pancreatic Elastase (E1), Saxarada	Weelka Muunada (dabool buluug ah)		Isticmaal alwaax yar oo sida qaado camal u qoran ama qaado (ha isticmaalin qoriga muunada) si aad ugu yaraan ugu soo qaado 1 qaado oo saxaro ah aadna ugu rido weelka muunada oo nadiif ah. Ha soo qaadin saxarada ay gaartay kaadidu.	Haku kaydin heerkulka qolka La qaboojiyay – 2 asbuuc Barafoobay – 30 maalmood
pH, Saxarada	Weel nadiif ah (daboolka buluuga ah)		Isticmaal alwaax yar oo sida qaado camal u qoran ama qaado (ha isticmaalin qoriga muunada) si aad ugu yaraan ugu soo qaado 1/2 qaado oo saxaro jilicsan ah aadna ugu rido weelka muunada oo nadiif ah. Ha soo qaadin saxarada ay gaartay kaadidu.	Barafoobay - 24 saacadood
Yareynta Walxaha, Saxarada	Weelka Muunada (dabool buluug ah)		Isticmaal alwaax yar oo sida qaado camal u qoran ama qaado (ha isticmaalin qoriga muunada) si aad ugu yaraan ugu soo qaado 1/2 qaado oo saxaro ah aadna ugu rido weelka muunada oo nadiif ah. Ha soo qaadin saxarada ay gaartay kaadidu.	Haku kaydin heerkulka qolka La qaboojiyay – 1 asbuuc Barafoobay – 2 asbuuc
Caabuqa sunta Rotavirus, saxarada	Weelka Muunada (dabool buluug ah)		Isticmaal alwaax yar oo sida qaado camal u qoran ama qaado (ha isticmaalin qoriga muunada) si aad ugu yaraan ugu soo qaado 1 qaado oo saxaro jilicsan ah aadna ugu rido weelka muunada oo nadiif ah. Ha soo qaadin saxarada ay gaartay kaadidu.	La qaboojiyay - 72 saacadood Barafoobay – aan muddo xadidan lahayn

Haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah ama aad dooneyso macluumaad ku saabsan baariitaankaaga, wac (800) 937-6575 ama booqo NationwideChildrens.org/Lab